

Waalidka Qaaliga ah

Waa maxay koox? Sidee ayaana cunugaaga loogu seexiyaa gaarigooda marka la gaaro waqtiga uu duhurkii seexdo dugsiga barbaarinta ilmaha?

Waxay u muuqan kartaa wax dhib badan u diyaarinta cunugaaga jadwalada cusub ee la shaqeynaaya bilaabista xarunta xanaannada marka cunugaagu uusan wali gaarin hadal.

DR Minisjang ayaa abuurtay taxanaha Talafishanka *Børste og vuggestuen* (Hedgy oo jooga Barbaarinta), kaasoo tusinaaya ilmaha socod baradka ah waxa ay filanayaan marka ay bilaabaan dugsiga barbaarinta.

Ku diyaari cunugaaga *Børste og vuggestuen*

Billoowga cusub badanaa waa dhib badan yihiin. Hase yeeshee, inaad si fiican u diyaar garoowdo way ku caawinaysaa.

Kahor inta aadan bilaabin dugsiga barbaarinta, waa muhiim in aad cunugaaga u diyaariso dhammaan waxyaabaha cusub ee ay u badan tahay inuu waajaho.

Sagaalka qaybood ee gaagaaban ee *Børste og vuggestuen* ayaa qabanaaya shaqadaas. Waxaan raacaynaa socod baradka Vilfred, Lucia, Oliver iyo Agnes, kuwaasoo dhammaan dhigta dugsiga barbaarinta. Waxaana arkaynaa waxa nolasha rasmiga ah uga dhigan tahay ayaga markay joogaan dugsiga barbaarinta.

Waxaan arkaynaa sida carruurta u arkaan marka waalidkoodu macsalaameeyo subixii, ama marka qof kale uu siiyo qaybta ugu danbaysa ee mooska. Waxaan sidoo kale arkaynaa sida carruurta loo dejiyo, iyo inay dareemaan farxad markale.

Taxaneyaashu waxay siinayaan cunugaaga fikir ku aadan noloshu dugsiga barbaarinta xataa haddii uusan wali hadli karin.

Guriga ku daawo

Waxaad taxanaha ka daawan kartaa oonleenka www.dk/spire iyo **DRTV**. Ku raaxeeyso!

